




Turjumaada qalabka baaritaanka guriga ee COVID-19.

Qalabka baaritaanka guriga ee COVID-19



Xirmo kasta oo COVID-19 ah waxa ay ka kooban tahay laba tijaabo oo antigen ah oo degdeg ah kuwaas oo ku siin doona natiijooyin 15 daqiiqo gudahood.

Yaa isticmaali kara baadhitaanka?



Baaritaanada waxaa loo isticmaali karaa qof kasta oo jiro 2 sano iyo waxii ka weyn. Dadka waaweyn waa inay ka qaataan baaritaanka carruurta ka yar 15 sano.



Ha u isticmaalin baaritaanka carruurta da'doodu ka yar tahay 2 sano.

Goormaan sameeyaa baaritaanka?



Waxaan leeyahay astaamo u eg COVID-19 - qandho, qufac, neefta oo yaraata, murqo xanuun, madax-xanuun, luminta dhadhan iyo urta oo cusub, cune xanuun, san duuf, san cabur.



Baadhitaan samee 7 maalmood gudahood markaad xanuun dareento. Haddii baaritaanka hore uu noqdo mid taban oo astaamuhu aysan soo rayn, ku celi baaritaanka 1-2 maalmood ka dib.



Waxaan la kulmay qof qaba COVID-19 - Waxaan 6 talaabo u jirsaday qof qaba COVID-19 ugu yaraan 15 daqiiqo.




Haa 5 maalmood kadib u baylah noqoshada

Goormee ayuu baaritaankayga dhacayaa?

Bishii Maarso, FDA waxay siisay kordhin saddex bilood ah oo loogu talagalay dhammaan Tijaabooyinka degdega ah ee Soo-saaraha difaaca jirka COVID-19 ee iHealth oo leh taariikhaha dhicitaanka markay tahay ama ka hor 2022-09-29 (SSSS-BB-MM). Tusaale ahaan: Haddii taariikhda dhicitaanka ee ku daabacan sanduuqaaga ay sheegeyso 2022-05-21 (SSSS-BB-MM), taariikhda dhicitaanka ee la cusboonaysiiyay waa 2022-08-21 (SSSS-BB-MM). Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah, <https://ihealthlabs.com/pages/news#expiration>.

Maxaan sameeyaa haddii baaritaanka la iga helo fayraska?




Baaritaanka togan ayaa tusi doona xariiq C iyo xariiq T ah. Fadlan ogow in xariiq T laga yaabo inuu qafiif noqdo.

Waa inaad guriga joogtaa oo aad ka fogaato dadka kale, oo ay ku jiraan qoyskaaga, ugu yaraan shan maalmood. Haddii aad leedahay astaamo, waa inaad is-gooni yeeshaa ilaa 24 saacadood ka dib marka astaamuhu kaa ba'aan adiga oo aan kaalmo daawo ah helin.

Wixii caawimaad ah, booqo [Oregon.gov/positivecovidtest](https://oregon.gov/positivecovidtest).

Ama wac **866-917-8881**, M-F laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 6 galabnimo iyo Sabtida, 10 subaxnimo ilaa 4 galabnimo.

Maxaan sameeyaa haddii la iga waayo cudurka?



Natiijada taban waxay soo muujin doontaa kaliya xariiq C.

Sii wad ku dhaqanka habdhaqanka badqabka leh sida xirashada maaskarada, gacma dhaqashada, iyo ka fogaanshaha ugu yaraan 6 fiit dadka kale. Haddii astaamuhu aanay ka soo rayn, sii wad inaad isgo'doomiso oo mar kale isbaar 1-2 maalmood gudahooda.



Miyaan u baahanahay inaan ka warbixiyo natiijadayda baaritaanka?

Maya, uma baahnid inaad ka warbixiso natiijooyinka baaritaankaaga. Haddii aad u baahan tahay caawimaad, booqo [Oregon.gov/positivecovidtest](https://oregon.gov/positivecovidtest). Ama wac 866-917-8881, M-F laga bilaabo 8 subaxnimo ilaa 6 galabnimo iyo Sabtida, 10 subaxnimo ilaa 4 galabnimo.

Sidee waxtar u leeyahay baaritaanku?

Natiijooyinka taban ee beenta ah waa ay dhacaan. Natiijo taban macnaheedu maaha in shakhsigu aanu qaadin COVID-19.

Sideen u tuuraa baaritaankan?

Baaritaanada la isticmaalo ayaa lagu ridi karaa qashinka caadiga ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah, <https://govstatus.egov.com/or-oha-covid-19-testing>

Si aad u hesho wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Baaritaanada Antigen-ka Degdegga ah ee iHealth, booqo <https://ihealthlabs.com/es/pages/ihealth-covid-19-antigen-rapid-test-details>.

Helitaanka dukumiintiga: Shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale oo dadban sida fasiraadaha, daabicida farta waaweyn, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Cutubyada Isgaarsiinta COVID-19 1-971-673-2411, 711 TTY ama COVID19.LanguageAccess@dhsosha.state.or.us